

Dowladda Soomaaliyeed ee Puntland Wasaaradda Qorsheynta, Horumarinta Dhaqaalaha iyo Iskaashiga Caalamiga ah Waaxda Tirokoobka Puntland



TUSAHA SICIRKA ADEEGGA DAMBIISHA

JANAAYO 2021

Warbixinta Tusaha Sicirka Adeegga Dambiisha ee Bisha Janaayo, 2021

Muunadda dambiisha adeegga qoysaska Puntland waxay ka koobantahay **387 shey** oo isugu jira **12**-ka qeybood ee hanaanka caalamiga ah ee kala soocidda adeegyada iyo badeecadaha iyadoo loo-eegayo ujeedo isticmaalka badeecad walba. Dambiishaan ayaa loo isticmaalaa lasocoshada iyo xisaabinta isbeddelka qiimaha maciishada.

Shaqaalaha Waaxda Istaatistikada Dawladda Puntland ayaa xogta sicirka mid kasta oo kamid ah 387-daan shey kasoo arruuriya suuqyada dhammaan magaaloyinka waaweyn ee Puntland si asbuucle ah.

Dhaqdhaqaaqa Billaha ee Tusaha Sicirka Adeegga Dambiisha


Tusaha Guud ee Sicirka Adeegga Dambiisha Suuqyada Puntland (TSD) ayaa intii lagu guda jiray bishii Janaayo 2021 hoos uga soo dhacay 88.76, halka uu bishii ka horeysay ee Diseembar, 2020 ka ahaa 90.13. Isbedelka bishii dhammaatay ee Janaayo ayaa ahaa hoos u dhac dhan 1.52 boqolkiiba, halka bishii ka horeysay ee Diseembar 2020 uu jiray kor u kac dhan 0.63 boqolkiiba.

Qeybaha badeecadaha ee sicirkoodu bishii Janaayo sida xoogan hoos ugu dhacay marka loo eego qeybaha kale ayaa kala ah: badeecadaha Dhaqanka iyo Madadaallada (-2.77%), Makhaayadaha iyo Hudheelada (-2.70%), Cuntada iyo Cabitannada (-2.42%), Kirada Guryaha, Biyaha, Korantada iyo Gaaska (-1.38%), Agabka qalabeynta iyo qurxinta Aqallada (-1.20%) iyo Caafimaadka (-1.07%).

Dhanka kale, hoos u dhaca ku yimid sicirka badeecadaha qeybaha kor ku xusan waxaa qeyb ahaan dheelitiray kor u kac ku yimid sicirka badeecadaha qeybta adeegyada iyo badeecadaha isku dhafka ah (1.21%), iyo qeybta Tubaakada & Qaadka (1.15 %).

Tan ayaa horseeday isu dhawaanshaha heerka tusaha Guud iyo Jiitimaad ku sugnaanshaha Jaantuuska dhaqdhaqaaqa Tusaha guud ee sicirka adeegga dambiisha sida ka muuqata jaantuuska hoose.


Jaantuuska 1aad: Jaantuusyada Heerka Sicir Baraka Iyo Dhaqdhaqaaqa Tusaha Guud Ee Sicirka Dambiisha Bisha Janaayo, 2021.



Jadwalka 1aad: Heerka Sicir bararka billaha ah ee -Diseembar2020 (2015=100)

Tusaha Sicirka Dambiisha, Juulay	
Tusaha (bishan) = Janaayo 2021	88.76
Tusaha (bishii hore) = Diseembar 2020	90.13
Tusaha (Janaayao, Sanadkii hore) = Janaayo 2020	84.90
Isbedelka % bilaha ah = Diseembar 2020/Janaayo 2021	-1.52
Isbedelka % sanadlaha ah (heerka sicir bararka) = Janaayo 2020/ Janaayo 2021	4.54

Jaantuuska 2aad: TSD, Isbedelka Billaha Ah ee Qeybaha Damiisha



Qaybaha Isbedelka uga badan ee dhanka Togan Ku Yimid Bisha Janaayo 2021

- Sicirka badeecadaha qeybta adeegyada iyo badeecadaha isku dhafka ah ayaa intii lagu guda jiray bishii tagtay ee Janaayo 2021 waxaa ku yimid sicir koror dhan (1.21%) marka loo eego isbedelkii bishii ka horeysay ee Diseembar 2020 oo la diiwaangashay sare u kac dhan (0.30%). Isbeddelka bisha Janaayo ayaa waxaa keenay sicirka agabyada iyo adeegyada is-qurxinta/daryeelka shaqsiga (1.57%).
- Sicirka **Tubaako iyo khaad** ayaa waxaa ku yimid kor u kac dhan ((1.15 %) intii lagu guda jiray bishii tagtay ee Janaayo 2021, halka bishii ka horeysay ee Diseembar 2020 la diiwaan galiyey hoos u dhac dhan (-0.62%). Kor u kaca bishaan ayaa waxaa sababay sicirka Qaadka oo kordhay (3.17%).

Qaybaha ugu muhiimsan ee isbedelka taban ku yimid bisha Janaayo 2021

- Sicirka badeecadaha iyo adeegyada **Dhaqanka iyo Madandaallada** ayaa hoos u dhacay (-2.77%) intii lagu guda jiray bishii Janaayo 2021, halka bishii ka horeysay ee Diseembar 2020 isbedelku ahaa hoos u dhac dhan (-

0.67%) Hoos u dhaca ugu badan ee qeybtaan ayaa ku yimid buugaagta iyo qalab xafiiseedka qoraallada loo adeegsado (-7.62%).

- **Maqaxiyaha iyo hoteelada:** badeecadaah iyo adeegyada ay ka koobantahay qeybtani ayaa bishii gudubtay ee Janaayo sicirkoodu hoos u dhacay (-2.70%), halka bishii ka horeysay ee Diseembar la diiwan galiyey sicir koror dhan (1.86%). Isbedelka bishii Janaayo waxaa keenay hoos u dhac ku yimid sicirka adeegyada makhaayadaha (-3.05%).
- **Cuntada Iyo Cabitaanadda** sicirkooda ayaa hoos u dhacay (-2.42%) bishii dhammaatay ee Janaayo 2021, halka bishii ka horeysay ee Diseembar la diiwan galiyey qiimo koror dhan (0.49%). Sicir jabka cuntada iyo cabitaanada ee bisha Janaayo waxaa keenay sicirka Cuntada oo hoos u dhacay (-2.49%).
- **Kirada Guryaha, Biyaha, Korantada iyo Gaaska** ayaa sicirkoodu hoos u dhacay (-1.38%) bishii dhammaatay ee Janaayo 2021, marka la-barbar dhigo bishii Diseembar oo uu jiray qiimo koror dhan (0.93%). Hoos u dhaca bishaan waxaa keenay Sicirka Shidaallada iyo gaasaska cuntada oo hoos u dhacay (-3.92%).
- Sicirka Agabka Qurxinta, qalabeynta iyo dayactirka Aqallada ayaa bishii dhammaatay ee Janaayo 2021 waxaa ku yimid hoos u dhac dhan (-1.20%), halka bishii ka horeysay ee Diseembar la diiwaan galiyey koror dhan (0.32%). Hoos-u-dhaca bisha Janaayo ayaa waxaa sababay sicirka agab hawlleedka guryaha (-2.25%).
- **Caafimaadka:** Sicirka adeegga iyo qalabka caafimaadka ayaa bishii gudubtay ee Janaayo raqisay (-1.07%) marka la barbardhigo bishii ka horeysay ee Diseembar oo la diiwaangaliyey qiimo koror gaarayey (0.51%). Sicirka Jabka bisha Janaayo ayaa loo tirinayaa hoos u dhac ku yimid qiimaha Daawada iyo agabka caafimaadka (-2.43%).

Tusaha Sicirka Dambiisha: Qaybo Si Gaar Ah Loo Eegay, Janaayo 2021


Cuntada Iyo Cabitaanada, Kirada Guryaha, Adeegyada, Biyaha, Korontada, iyo Gaaska ayaa celcelis ahaan hadda ah qaybaha ugu muhiimsan dambiisha Addegga, maadama ay saamiga ugu badan ka yihiin kharashaadka qoysaska, tan ayaa ka dhigaysa qeybaha inay saameynta ugu badan ku yeeshaan isbedelka Tusaha guud ee Sicirka Dambiisha Sida aynu kor kuso sheegnay, **Cuntada Iyo Cabitaanadda** sicirkooda ayaa hoos u dhacay (-2.42%) bishii dhammaatay ee Janaayo 2021, halka bishii ka horeysay ee Diseembar la diiwan galiyey qiimo koror dhan (0.49%). Sicir bararka sanadlaha ah ee qaybta cuntada iyo cabitaanada ayaa 12kii billood ee ku ekaa Janaayo 2021 kordhay (4.15%) marka loo eego sicir bararka sanad dhammaadkii ama 12kii billood ee ku ekaa Diseembar 2020 oo gaarayey (7.04%).

Jadwalka 2aad: Isbedelka Billaha ee qeybaha ugu muhiimsan Cuntada (Nofeembar 2020 ilaa Janaayo 2021)

Magaca shayga	Nofeembar	Diseembar	Janaayo
Cuntada iyo Cabitaanada	0.58	0.49	-2.42
Cuntada	0.58	0.50	-2.49
Rootiga, Bariisaka, Burka iyo badarka	1.26	0.54	-3.57
Sonkorta	1.89	-0.59	-1.89
Hilibka noocyada xoolaha	0.48	0.06	-1.09
Kalluunka	0.0	0.44	-7.57
Caanaha liiska ah iyo kalluunka	0.40	-1.69	-1.73
Saliida iyo ashyaada dufanka leh	0.93	1.40	0.89
Miro Beeraadka sida Cambaha & Muuska	1.55	0.02	-0.68
Khudaarta Cagaaran	2.78	-1.11	2.08

Dhanka kale, **Kirada Guryaha, Biyaha, Korantada iyo Gaaska** ayaa sicirkoodu hoos u dhacay (1.38%) bishii dhammaatay ee Janaayo 2021 marka loo-barbar dhigo bishii Diseembar oo uu jiray qiimo koror dhan (0.93%). Sicir bararka sanadlaha ah ayaa 12kii bilood ee ku ekaa Janaayo 2021 ayaa ahaa koror dhan (0.29%), halka sanadkii ka horeeyey ee ku dhammaanayey Diseembar 2020 la diiwaangashay sicir-barar dhan (1.02%).

Jaantuuska 3aad: TSD Guud Iyo Qeybo Si Gaar Ah Loo Eegay




Source: Puntland Statistics Department

Dhaqdhaqaaqa Sanadlaha ee Tusaha Sicirka Dambiisha ee Sanad Dhamaadka Janaayo 2021

Isbedelka sanadlaha ah ee heerka sicir bararka 12kii bilood ee u dhexeeyey billihii Janaayo 2020 ilaa Janaayo 2021 ayaa ahaa koror dhan 4.54 boqolkiiba, halka sanad dhammaadkii ku ekaa Diseembar 2020 la diiwaan galiyay sicir koror dhan 6.22 boqolkiiba.

Qaybaha badeecadaha ee sicirkoodu sida xoogan u siyaday 12-kii bilood ee u dhexeeyay Janaayo 2020 ilaa Janaayo 2021 ayaa kala ah: Qalabka iyo Adeegyada isku jirka ah (18.78%), Caafimaadka (16.49%), Maqaaxiyaha iyo Huteelada (15.61%), Gaadiidka (9.91%), Tubaakada iyo Qaadka (9.60%), Dharka iyo Kabaha (6.51%) iyo ugu danbayn Cuntada iyo Cabitaanda (4.15%) Guud ahaan qaybaha badeecadaha oo dhan ayaa la kulmay sicir kac togan.

TSD: Jaantuuska 4aad; Sicir-bararka sanadlaha ah ee qeybaha badeecadaha iyada oo loo eegayo hanaanka caalamiga ah ee kala soocida badeecadaha; Janaayo 2021.



Qaybaha sicir bararka Xoogan ee sanadlaha ah uu ku dhacay sanad dhamaadka Janaayo 2021

- **Qaybta Adeegyada isku dhafka ah** ayaa sanad dhammaadkii Janaayo 2021 kor u kacay (16.33%) marka la barbardhigo sanadkii ku ekaa Diseembar 2020 (18.78%), Isbedelkaan intiisa badan wuxuu ka yimid qiimo koror ku yimid sicirka agabka xaragada (25.85%) iyo alaabada daryeelka shakhsiga (16.83%).
- Sicirka qalabka, adeegyada iyo dawada **Caafimaadka** ayaa intii u dhaxaysay Janaayo 2020 iyo Janaayo 2021 kacay (16.49%) marka la barbardhigo sicirbararkii sanadkii ku dhammaanayey Diseembar 2020 oo la diiwaan-geliyey koror gaaryey (19.92%). Sicir kororkan waxaa sababay sicirka agabka caafimaadka iyo dawada oo kordhay (18.45%) iyo Adeegyada Cusbitaalada oo iyana siyaaday (16.94%).
- **Makhaayadaha Iyo Huteelada** ayaa sanad dhammaadkii Janaayo 2021 kor u kacay (15.61%), halka sanad dhamaadkii Diseembar 2020 uu kordhay (19.40%), Isbedelkaan intiisa badan waxaa keenay sicirka adeegyada Makhaayadaha oo kordhay (17.59%).
- **Adeegga iyo agabka Gaadiidka** ayaa sanad dhammaadkii Janaayo 2021 sicirkoodu kordhay (9.91%), marka la barbardhigo 12kii billood ee ku dhammaanayey Diseembar 2020 oo uu jiray koror dhan (10.51%). kor u kacay ayaa ka yimid Adeegga Safarka (16.01%).
- **Sicirka Tubaakada Iyo Jaadka** ayaa sanad dhammaadkii bisha Janaayo 2021 kor u kacay (9.60%) halka uu sanad dhamaadkii Diseembar 2020 uu jiray (10.57%). Isbedelka intiisa ugu badan ayaa ka yimid Tubaakada (13.41%).

- **Dharka iyo Kabaha** ayaa 12kii billood ee ku ekaa Janaayo 2021 gaarayey (6.51%) marka loo eego sicir bararka sanad dhamaadkii ama 12kii billood ee ku ekaa Diseembar 2020 oo gaarayey (6.01%). Isbedelkaan intiisa badan waxaa sababay sicirka kabaha oo kordhay (11.90%) iyo dharka (5.37%).
- **Cuntada iyo Cabitaanada** ayaa 12kii billood ee ku ekaa Janaayo 2021 oo kor u kacay (4.15%) halka sanad dhamaadkii Diseembar 2020 la diiwaan-geliyey sicir koror dhan (7.04%) Sicir-bararka qeybtaan ayaa loo anaynayaa Cuntada (4.28%).


Dhamaan isbedelka sicirka qaybaha Tusaha Sicirka Adeegga Dambiisha ayaa sanad dhamaadkii Diseembar 2020 ahaa mid togan.

Tusaha Sicirka Adeegga Dambiisha: Sookoobidda dhaq-dhaqaaqa iyo Dhibco ku biirinta Miisaanka Dambiisha

Jadwalka 3: Tirooyinka ugu muhiimsan dhaq-dhaqaaqyada Janaayo 2021 (Index = 100 at 2015)

COICOP Classification Group	Jan-20 Index	Dec-20 Index	Jan-21 Index	Dec-20 to Jan-21 (monthly) % change	Jan-20 to Jan-21 (annual) % change
TSD ee dhaman qaybaha badeecadaha	84.90	90.13	88.76	-1.52	4.54
Cuntada iyo Cabitaanada	81.93	87.45	85.33	-2.42	4.15
Tubaakada iyo Jaadka	90.30	97.85	98.97	1.15	9.60
Dharka iyo Kabaha	85.97	91.88	91.56	-0.34	6.51
Kirada guryaha, Biyaha, korontada, Gaaska iyo Shadaalda kale	86.90	88.37	87.15	-1.38	0.29
Agabka guryaha iyo Dacdirka	88.85	91.32	90.23	-1.20	1.56
Caafimaadka	83.24	98.02	96.96	-1.07	16.49
Gaadiidka	91.52	100.56	100.60	0.04	9.91
Isgaarsiinta	87.90	87.45	87.58	0.16	-0.36
Dhaqanka iyo Madadaalada	102.88	104.67	101.76	-2.77	-1.08
Waxbarashada	88.17	90.61	90.61	0.00	2.77
Maqaaxiyaha iyo Huteelada	72.80	86.50	84.17	-2.70	15.61
Badeecadaha iyo Adeegyada isku jirka ah	108.28	127.08	128.61	1.21	18.78

Jaantuuska 5aad: Sida qaybaha Dambiishu ay Dhibcaha ugu biiriyaan Tusaha Guud iyada oo la eegayo miisaanka Qeyb waliba leedahay



Source: Puntland Statistics Department

FG: Saameynt ay qayb kasta oo kamid ah qeybahaha uu kakooban yahay hanaanka kala soocida badeecadaha ay ku yeelanayso isbedelka Tusaha guud ee Sicirka Adeegga Dambiisha waxay ku xiirantahay hadba saami culeyska ay qeyb walba ka tahay culeys dhismeedka Guud.